# Golaha Wakiillada JSL

## Waaxda Shuruucda, Hadal-qoraalka iyo Fadhiyada

**Golihii 5aad, Kal-fadhigii 12aad, Fadhigii 10aadaad**

**12 August 2025**

**Quraanka:** Md. Axmed dayib AadaM (ku-cadeey)

**Gudoonka: - Siciid Mire Faarax (Giire)**

**Ajandaha Fadhiga:-** *Warbixinta Wasaarada Maalgashiga iyo Warshadaha oo ka warbixiyay xeerka Horumarinta warshadaha iyo wax ka bedelka xeerka maalgashiga*

**Gudoomiyaha:-** waxaynu soo dhowaynayanaa Wasiirka Macdanta iyo Tamarta si uu inoogu sharaxo muhiimada iyo baahida keentay in wax ka badel iyo kaabis lagu sameeyo Xeerkan Tamarta Kororntada, Mudane Wasiir ku soo dhawow.

**Md. Siciid Maxamed Buraale Wasiirka Wasaarada Horumarinta Maalgashiga Iyo Warshadaha:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim mudane Gudoomiye iyo ku xigeenada, Baarlamanka sharafta leh ee qiimaha iyo qaayaha runtii miisaan wayna Dalka ku leh sharaf wayn bey iitahay aniga iyo tiimka ila socda aan hortiina nimaadno farxad wayn bey iitahay.

Waxa ina horyaala Xeer, mudadii 34 sano ee Somaliland jirtay waa markii ugu horaysay ee uu soo gaadho, Baarlamanka, manta wadanku waxa uu udhaqaaqay kacaankii wershadaha oo kale, manta Somaliland waxay maraysaa heer uu wadankeenu isu badelo inuu noqdo wadan warshadaha latalaabsanaya iyaga oo xaga hoose kasoo abuurmay mudadaa 34sano ee aynu jirnay iminkana ay marayso halkii ugu quruxda badnayd ka dawlad ahaan ama dawladihii iskaga danbeeyay ee Somaliland maalinba qolo ayaa meel soo gaadhsiinaysay, maantana runtii waxaan aad ugu faraxsanahay in uu xeerkii warshaduhu uu soo gaadho Baarlamanka JSL oo uu hortiina yaalo.

Mudane Gudoomiye, xildhibaanada sharafta leh ee Gollaha wakiilada JSL waxaan halkan idinku soo gudbinayaa qabyo qoraalka xeerka horumarinta warshadaha, xeerkan oo muhiimad gaar ah leh maadaama uu saamaynayo Bulshada kala duwan ee JSL hindisa sharciyeedkan horumarinta warshadaha waa kii ugu horeeyay ee uu Dalku yeesho, kaas oo qeexaya hanaanka maamul, daryeelka iyo Horumarinta warshadaha Somaliland.

Xeerkani waxa uu si cad uga jawaabayaa baahida deg-dega ah ee uu Qaranku ugu jiro in la helo warshado casri ah oo awood uleh in ay wax soo saaraan, shaqo abuuraan isla markaana kaalin muuqata ka qaataan kobcinta dhaqaalaha iyo yaraynta ku tiirsanaanta Alaabada dibada laga keeno.

Siyaasada xukuumada ee wershadaha himilooyinka iyo ujeedooyinka guud ee siyaasada Horumarinta warshadaha waxaa ka mid ah, in su hufan oo wax tar leh looga faa`iidaysto khayraadka Dalka si kor loogu qaado wax-soosaarka gudaha loona yareeyo ku tiirsanaanta Badeecooyinka dibada laga keeno.

In la abuuro lana balaadhiyo fursadaha shaqo ee muwaadiniinta reer Somaliland si kor loogu qaado Heerka Nololeed loona dhimo saboolnimada iyo kala duwanaanshaha Dakhliga Bulshada dhexdeeda ah.

In la suurtagaliyo deegaan ganacsi iyo maalgashi oo ku haboon kaas oo soo jiita maalgashadayaasha Gudaha iyo Dibadaba gaar ahaan kuwa wadaaga maalgalinta warshadaha.

In la hirgaliyo hab maamul oo casri ah oo isku xidha dhamaan qaybaha wax soo saarka dalka iyo hanaanka warshadaynta si loo fudaydiyo hanaanka Ganacsi iyo horumarinta warshadaha.

In la dhiiri galiyo warshadaynta ku salaysan Tichnology ga casriga ah iyo maaraynta waarta ee khayraadka si loo gaadho wax- soo saar Tayo leh iyo tar tan suuqa ah.

Ujeedooyinka Xeerka waxaa ka mid ah.

1. in la helo, Xeer fududaynaya, hirgalinta warshadaha maxaliga ah iyo kuwa shisheeyaba.

2. In kor loo qaado oo la hor mariyo wax-soosaarka wershadaha kuwa dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahayba.
3. In la helo Nidaam sharci oo sicad u qeexaya hanaanka Diwaagalinta iyo Ruqsad bixinta warshadaha si loo fudaydiyo adeegyada ruqsadbixinta ee dhamaan noocyada kala duwan ee warshadaha.
4. In meesha laga saaro wax kasta oo caqabad ku ah hawlaha maalgashi ee warshadaha iyada oo la abuurayo Nidaam hufan oo suurta galinaya in lasoo jiito oo la hanto, maalgashadayaasha warshadaha Dalka.
5. In la abuuro Jawi saamaxaya maalgashiga warshadaha si loo helo korodh dhinaca shaqo abuurka ah isla markaana loo xoojiyo wax- soosaarka Gudaha dalka.

Hanaanka iyo marxladaha uu soo maray Xeerkani mudane Gudoomiye iyo xildhibaanada sharafta leh xeerkani waxa uu soo maray dhamaan, Talaabooyinka iyo Geedi socodka.

- Mar xalada koobaad wasaarada maalgashiga horumarinta warshadaha ayaa qabatay Deraasooyin iyo sahamo qoto dheer oo ku saabsan xaaladaha iyo

baahida iyo caqabadaha warshqadsha Dalka si loo helo xog sugsn oo lagu salaylanayo siyaasada warshadaha.

- marxaladii labaad iyada oo laga ambaqaadayo Natiijooyinkii Daraasadaha waxaa la diyaariyay siyaasada Qaranka ee horumarinta warshadaha taas oo dejisay jihada iyo himilada guud ee horumarinta warshadaha.
- Marxalada seddexaad siyaasadan ayaa noqotay Aas-aaska laga soo bilaabey diyaarinta Xeerka warshadaha iyada oo ka dibna lasameeyay wadatashiyo balaadhan oo lala yeesho warshadlayda, Hay`adaha Dawliga ah iyo daneeyayaasha kale ee warshadaha si loo helo Ra`yi ka duwan iyoTalooyin wax ku ool ah.
- Marxalada afraad xeerkan ayaa dib loo eegay laguna sameeyay hagaajin iyo sixitaan iyada oo laga Tixraacayo faalooyin, iyo Talooyin kasoo baxay wadatashiyadii hore.
- Marxalada shanaad Xeerka ayaa waxa loo gudbiyay Xafiiska Garyaqaaanka guud si sharci ahaan loo eego loona Ansixiyo ka dibna waxa uu u sii gudbey oo Ansixiyay Gollaha wasiirada JSL taariikhda markii ugu horaysay ugu danbayntiina xeerku waxa uu usoo Gudbey Gollaha sharafta leh ee Gollaha wakiilada si looga doodo, looga faaloodo, loona Ansxiyo si Rasmi ah.

Qodobka 5aad qaab dhismeedka Xeerka iyo Qodobada muhiimka ah ee xeerka, xeerkani waxa uu ka kooban yahay 6 Cutub iyo 45 Qodob kuwaas oo daboolaya arrimaha muhiimka ah ee horumarinta warshadaha Dalka.

Qodobada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah Aaga warshadaha, Xeerku waxa uu dhigayaa in laga hirgaliyo oo ay wasaaradu maamusho aag warshadeed oo Gobolada dalka oo dhan oo casri ah, iyo adeegyo dhamaystiran oo laga hirgaliyo Gobolka kasta si loo fudaydiyo wax soo saarka,

Ruqsadaha gaarka ah ee dejinta Nidaam cad oo ruqsad gaar ah lagu siinayo warshadaha buuxinaya shuruudaha ku filaanshaha suuqa iyo Guud ahaan Dalka oo muddo cayiman ah.

Ugaaryeelida warshadaha muwaadiniintu ay leeyihiin, damaanad qaad in qaar ka mid ah warshadaha muhiimada ah ay maalgashan karaan kaliya muwaadiniin Somaliland ayuu Xeerkani ka turjumayaa si loo ilaaliyo Danaha Qaranka.

Dhiiri galinta warshadaha yar-yar iyo kuwa dhex-dhaxaadka ah, Xeerku waxa uu dhiiri galinayaa warshadaha yar-yar iyo kuwa dhexe iyada oo loo fudaydinayo helida maalgalin, iyo xirfadeed, helitaanka suuq dibadeed si kor loogu qaado awoodaha Tartan.

Ilaalinta deegaanka ayuu Xeerkani ilaalinayaa waxa uu sugayaa in warshad kastaa ay qaado Talaabooyin lagu ilaalinayo badqabka deegaanka, iyo Caafimaadka Bulshada.

Maamulka iyo kormeerka warshadaha xeerku waxa uu qeexayaa awoodaha iyo masuuliyadaha wasaarada ee fulinta kormeerka iyo horumarinta warshadaha.

Mudane Gudoomiye xildhibaanada sharafta leh waxaan si xushmad leh idiinka codsanayaa ka wasaarad ahaan horumarinta warshadaha iyo maalgashiga iyo tiimka aanu ku wada soconaba in Golluhu xeerkan oo muhiimad wayn uu u leeyahay Dalka iyo Dadkaba, mustaqbalka Qarankeenuna uu waajib sharci inuu siinayo isla markaana si sharaf leh oo karaama leh idinka codsanaynaa in aad Ansixisaan.

Ansixintu waxay noqonaysaa talaabo fure u ah wasaarada horumarinta maalgashiga iyo warshaduhu ina ay si hufan u hirgaliso ugana dhabayso himilooyinka horumarinta warshadaha, shaqo abuurka iyo kobcinta wax-soosaarka Gudaha dalka.

Aad iyo aad baad umahadsantihiin dhamaan xildhibaanada sharaftaleh waxaan mar labaad idinka codsanayaa insha allah hadii alle Raali ka noqdo, xeerkan waa taariikhda markii ugu horaysay ee hortiina yimaado oo uu usoo gudbo Gollaha wakiilada JSL, xeerkan warshaduhu, waxaana ayaan daro inagu ah mudada 34ta sano ah ee aynu jirnay in aynaan wadankeenu xeer warshadeed lahayn.

Wasaarada horumarinta warshaduhu dalka waxay u haysaa muhiimad wayn ka baarlamaan ahaan waxaan aamin sanahay cida kaliya ee fahamsan wasaaradani heerka iyo halka ay ka taagan tahay in aad idinka tihiin, waanan ku faraxsanahay in ay manta Baarlamanka ay joogto wasiir ka mid ah wasiiradii soo maray, walaashay Aamina fariid ay manta joogto, aad iyo aad baan ugu faraxsanahay, ka wasaarad ahaana xaqiiqda dhabta ah waa albaabka wadanka laga soo galo muhiimada ay u leedahay dalka maalin walba waxa aynu jecelnahay talaabooyinka uu caalamku marayo in aynu marwalba la jaanqaadno sida uu manta Xeerka warshuduhu uu hortiina uyaalo, sidaa si leeg waxaa jira Xeerkii maalgashiga waa xeer 2022 kii 99 Qodobkiisu ahaa xeerkaasi waxa uu ka maarmi waayay in dibu eegis lagu sameeyo maadama uu la talaabsan kari waayay xeerarkii hore ee caalamka ka jiray.

Oo runtii dadka maalgashadayaasha inoo imanaya ama dhaqaale ahaan markaanu meelo badan ka eegnay waxa aanu go`aan ku gaadhnay in aan idiin soo gudbino Qodobo gaar ah xeerku inta kale sidiisii weeye.

Qodobka 23 ee xeerka maalgashiga Somaliland oo Numberkiisu yahay 99/ 2022 waxa uu udhignaa sidan, cashuur dhaafka macaashulmacaashka maalgaliye kasta oo la siiyay shahaado maalgashigu waxa uu xaq u leeyahay cashuur dhaaaf macaashul-macaash ah oo udhigma 100% 5 ta sano ee hore oo ka bilaabmaysa marka uu mashruuca maalgashigu shaqada bilaabayo sidaa si leeg 50% 5ta sano ee xiga in la cashuuro waxaa lagu sameeyay kaabis iyo wax ka badal.

Qodobka cusub waxa uu dhigayaa Qodobka 23aad cashuur dhaafka macaashul-macaashka ahi maalgaliye kasta oo la siiyo shahaadada maalgashigu waxa uu xaq uleeyahay cashuur dhaafka macaashul-macaashka oo udhigma 100% 3 sano meeshii 5 sano ahayd waxaanu ka dhignay 3 sano oo bilaabmaysa marka uu mashruucu uu shaqada bilaabo ma aha marka la aasaaso muhiimada aynu uga jeednaa waxa weeye in lala socdo xaalad kasta iyo waqti kasta halkaana cashuuro badan inagu dhaafin oo ayna noqon mid abadiyan iska socda.

Asbaabta wax ka bedelka iyo kaabista Qodobka 23aad ee hore waxa uu maalgashadayaasha siinayaa cashuur dhaaf macaashul-macaash ah oo ah 100% muddo 5sano ah iyo 50% sano oo dheeraad ah se waxaa laga dhigay mudo3 sano ah oo ka bilaabmaysa marka mashruuca maalgashigu uu shaqada bilaabo, Asbaabta looga dhigay mudadii 10 sano ee cashuur dhaafka ahayd muddo 3 sano ah waxa kamid ah in laysku dheelitiro hirgalinta maalgashiga iyo kor uqaadka Dakhliga cashuuraha iyada oo mudada 3 sano ah ay ku filan tahay dhiiri galin maalgashiga si ay u hana qaadaan.

In layareeyo mudada dheer ee cashuur dhaafka si ayna usaamayn ama aanu ulumin Dakhliga cashuuraha ee Dalku maadaama uu dalkeenu uu ku tiirsan yahy dakhliga cashuurta.

In dawladu hesho dhaqaalaha ay ku fuliso arrimaha Bulshada iyo kaabayaasha dhaqaalaha dalka.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada**
--------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
------------------------------------------